

## Tusaalaha Bayaanka Saamaynta Sinaanta Soo Jeedinta iyo Soo Bandhigida Gudiga Iskuulka

**Ciwaan**

**ka:** Warbixinta Sanadlaha ee Degmada Wellness Policy SY19-20

**Taariikhda:** Ogos 4, 2021

Miyaa [Qalabka Qorsheynta Sinaanta Isirka](#) la isticmaalay?  Haa  Maya

Haday tahay haa, gali taariikhda(ha) kulamada REPT iyo linkiga REPT ga la dhameystiray halka: \_\_\_\_\_

Miyaad xubin ka tirsan Qeybta Sinaanta, Farqiga Siyaasada iyo Fursadaha, dib u eegtay bayaananka?  Haa  Maya

| Qeybaha Qalabka Qorsheynta Sinaanta Isirka BPS   | Soo-koobid/Sabab  |
|--|---|
| <p><b>1. Soo-jeedinta/Soo-bandhigida &amp; Saameynta</b><br/><i>Waa maxay natijoyinka la rabo ee codsiyada/dadaalada, oo ay ku jiraan ka saarida meesha khilaafka? Yaa hogaamiyey shaqadan/qorsheyntan, oo miyey ka turjumayaan aqoonsiga kooxaha ardeyda iyo qoysaska (kooxaha muhiimka ah oo ay ku jiraan shakhsiyaadka Madow, Latinx, Eeshiyaanka ah, Dhaladka ah, muhaajiriinta, luuqadaha badan, ee leh khibrada Waxbarasho Gaara)?</i></p> | <p>Golaha Degmada Wellness (DWC) waa gole kormeer la talin oo la magacaabay. DWC sharciga ayaa uga baahan(2010 Xeerka Caafimaadka, Daryeelka Caruurta iyo M.G.L. c. 111, §233, 105 CMR 215.000) inuu soo gudbiyo warbixintan. Warbixinta waxa loo gudbinayaa Gudida Dugsiga oo wata talooyinka sida degmadu u horumarin karto hirgalinta. Golaha waxa gudoomiya Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Caafimaadka &amp; Komishanka Wellness iyo Agaasimaha Caafimaadka Dadweynaha Boston; xubnimada hadu waa kala duwanaan ku saleysan midab, isir, jinsi, xiriir daneeyayaal, iyo aqoon. Golaha waxa ku jira kuraasta wakiilada mid kastoo ka mida saddexda gole waalid ee degma iyo labo kursi oo wakiilada Golaha Ardeyda Boston ah (BSAC). Warbixintani waxa soo ururiyey Xafiiska Caafimaadka iyo Kooxda Qiimeynta &amp; Xogta Wellness oo kaa shanaaya gudi hoosaadka DWC. Qabyo-qoraalo ayey dib u eegeen xubnaha DWC iyo kasoo qeybgalayaasha kulamada dadweynaha ee DWC.</p>  |
| <p><b>2. Waafaqsanaanta Qorshaha Siyaasada</b><br/><i>Sidee baa qorshaha istaraatiijiga degmadu u waafaqsan yahay codsiga/dadaalka?</i></p>  | <p>Degmadu waxay ugu talo gashay inay abuurto deegaan waxbarasho oo badqa, caafimaad leh, oo dhaqan ahaan iyo luuqad barasho ahaan ku haboon cunug kasta oo fasalkastoo dugsiga ah. Siyaasadayada Balaadhan ee Degmada Wellness waxay dejinaysaa wada lagu gaadhayo hadafkaasi. Warbixinta sanadlaha ah waxay baadhaysaa sida siyaasada loo hirgalinaayo, loona dabogalaayo natijada caafimaadka ardeyga iyadoo loo tixgalinaayo isirka, jinsiga iyo rabitaanka galmo. Siyaasada Wellness waxay taageeraysaa dhinac kasta oo qorshaha siyaasada degmada ah, oo ay ku jiraan 1.8 (wax ka qabashada sababayaasha caafimaadka iyo bulshada ee farqiga u dhaxeeya), 2.3 (tilmaamaha si buuxda uga qeyb noqda wanaaga ardeyga); 3.7 (ku hawlan qoysaska iyo bulshada si loo fahmo baahiyaha); 4.4 (kor u qaadista xarumaha caawiya caafimaadka); 5.4 (macalimiinta shaqada taageeray); iyo 6.5 (la shaqeynta shuraakada muhiimka ah).</p>  |
| <p><b>3. Falanqeynta Xogta</b><br/><i>Xogtee ayaa la falanqeyey? Miyaa lagula kala saaray jinsiga iyo kooxa kale? Maxay muujisay oo khuseysa kala duwanaanshaha?</i></p>   | <p>Xogta ku jirta warbixintani waxay ka imanaysaa dhowr meelood, waxayna ku saleysan tahay Ilaalinta Siyaasada Wellness iyo Qorshaha Qiimeynta. Xogta hirgalinta siyaasada waxa loosoo ururiyey heer degmo iyo dugsi inta badan, lakiin natijada caafimaadka ardeyga waxa loosoo ururiyey isir, jinsi, iyo xaalada xogt Xog-ururinta Hab-dhaqanka Khatarta Dhalinyarada, rabitaanka galmo. Meelaha xogta waxa ka mida Xarunta Xakameynta Xanuunada (CDC) Xog-ururinaha Diwaanka Caafimaadka Dugsiga, Xog-ururinta Cimilada Dugsiga, kaydka shaqaaleysiinta Shaqaalaha, xafiiska guud ee waaxda diwaangalinta barnaamijyada, Xogta Hab-dhaqanka Khatarta Dhalinta Dugsiga Dhexe iyo Sare, kaydka kalkaalisada dugsiga, iyo warqada Qorshaha Talaabada dugsiga ee Wellness.</p> <p>Xogta Kalkaalisada BPS waxay muujinaysaa 19.8% ardeydu inay leeyihiin xiiq sareysa boqolkiiba ardeyda midabka leh oo laga helay xiiqda (22% midabada kala duwan ardeyda, 21% ardeyda Madow, 20% ardeyda Eeshiyaanka ah, 20% ardeyda Hisbaaniga/Laatiin ah, 15% ardeyda Mareykanka dhaladka ah/Baasifiga Degan, iyo 14% ardeyda Cadaanka ah). Xog-ururinta Khatarta Hab-dhaqanka Dhalinta Boston 2019 waxay muujinaysaa in 14.8% ardeyda dugsiga sare ah lagula taliyey jimicsi jidheed oo maalinle ah (≥60 daqiiqo/maaliintii), xisaab ahaan</p> |

|  |   |
|--|---|
|  | <p>ka yar ardeyda gobolka oo dhan (21.7%) iyo qaran ahaan (23.2%). 19.5% ardeyda dugsi dhexe ah ayaa helay talada jimicsi jidheed oo maalinle ah. 24.7% ardeyda dugsi sare waay cuneen quraac maalinle ah, xisaab ahaan ka yar ardeyda gobolkoo dhan (30.8%) iyo qaran ahaan (33.1%). 45% ardeyda MS ayaa maalinle u cunay quraacda. Ardeyda dugsi sare, 35% ayaa dareemay murugo joogto ah maalinkasta labo ama in kabadan todobaado xiriira. Ardeyda dhediga ah ayaa xisaab ahaan soo sheegaya inta badan murugada joogtada ah marka la barbar dhigo dhigooda labka ah (44.8% vs. 25.1%) oo ardeyda isku aqoonsada inay ninow naag yihiin, gay, ama labada jinsi ayaa kaga badan dhigooda (59.1% vs. 30.5%).</p>  |
| <p>4. <b>Daneeyayaasha kaqeybqaadanaaya</b><br/><i>Yaa ka shaqeeyey (tirada, kooxaha muhiimka ah, iyo doorarka) iyo sida, iyo waxa natiijadu noqotay? Maxaa ardeyda/qoysaska inta ugu badan saameeyey codsigan/dadaalkan?</i></p>  | <p>Waxa intaasi dheer xubnaha kormeerka guud (sare lagu sharxay) kulamada DWC iyo ka qeybgalka gudi hoosaadka dhanka siyaasada golaha ayaa u furan dadweynaha. Xogta loosoo ururiyey warbixintani waxa dib loogu eegay kulamada dadweynaha iyadoo la maraayo dodo kooxo kooban si loo helo jawaabcelin.</p>   |
| <p>5. <b>Siyaasadaha Sinaanta Isirka</b><br/><i>Sidee ayuu codsigan/dadaalkan u yareeyey kala duwanaanshaha una kordhiyey jinsiga iyo saamiga kale? Waa maxay cawaaqibta aan lagu talo galin ee macquulka ah? Istaraatiijayadehee ayaa kor u qaadaya saamiga?</i></p>                                | <p>Warbixintu waxay ka caawinaysaa degmadu inay baadho dadaalkeeda Dugsigoo Dhan, Bulshadood Dhan, nidaamka Cunuga ee Dhameystiran ilaa caafimaadka ardeyga iyo badqabkiisa. It makes recommendations to the Superintendent and School Committee on strategies to increase policy implementation, thereby reducing opportunity gaps and health disparities. DWC waxay raacaysaa <a href="#">Nidaamka Siyaasada DWC</a> wareega hirgaalinta siyaasada, oo ku lgule ilaalinta joogto ah, qiimeyn, iyo ka qeybgalka si ay u aqoonsadaan caqabadaha iyo saameynta loo kasay iyo midaan loo kasin. Iyadoo la isticmaalaayo nidaamka ay weheliyaan qodobada Qalabka Qrosheynta Sinaanta Isirku waxay ka caawinayaan goluhu inuu diirada saaro natiijooyinka oo si firfircoon kor ugu qaado xeerarka sinaanta. Taloooyinka warbixintani waxay kordhinaysaa isirka iyo sinaanta kale iyadoo hubinaysa waxbarasho caafimaad oo tayo dhameystiran, waxbarasho jidheed iyo barasho dareen iyadoo la maraayo fasal wabarasho oo ardey kastoo dugsi ah. Awoodani waxay ku saleysan tahay nidaamka horumarinta aqoonta, xirfadaha, iyo isku filaanta ka qeybgalka hab-dhaqanka caafimaadka leh ee ardeyda. Warbixintani waxay sidoo kale hoosta ka xariiqaysaa horumarinta kaabayaasha dhaqaale iyo kordhinta shaqaalaha dugsi si loo siiyo adeegyo taageero oo horumariyey degmada iyo hirgalinta siyaasada dugsi.</p> |
| <p>6. <b>Miisaaniyada &amp; Hirgalinta</b><br/><i>Waa maxay saameynta miisaaniyadu? Sidee ayaa hirgalintu u hubinaysaa in dhamaan ujeedooyinka, gaar ahaan ujeedooyinkala xiriira sinaanta, la gaadhay? Waa maxay kooxaha aqoonsiga kale ee kooxda hirgalita, oo miyey eegi doonaan saamiga?</i></p> | <p>Warbixintani waxay hubinaysaa hirgalinta siyaasada sideeda qeybood iyadoo mareysa dhanka sinaanta, kuna talinaysa hirgalin dhameystiran. Hirgalintu waxay u baahan tahay taageero qeybo xafiis dhexe iyo shaqaale dugsi. Taloooyinka warbixintani waa in lagu tixgaliyaa go'aan qaadashada qoondayntaKaalmada Degdega ah ee Dugsiga Dhexe iyo Sare (ESSER) maalgalinta. Soo jeedinaha gaarka ah ee ESSER waxa soo gudbiyey shakhsiyadka waaxaha lagu qotamiyey siyaasada lagu taageerayo nidaamka Cunuga.</p>  |
| <p>7. <b>Isla Xisaabtanka &amp; Xiriirka</b><br/><i>Sidee ayaa loo qiimeyn, qori, looguna wada xiriir doonaa saameynta si loo gaadhsiiyo daneeyayaasha? Yaa ka masuul noqon doona?</i></p>   | <p>DWC iyo sideedeeda gudihoosaad waxay diyaariyeen qorshe qiimeyn iyo kormeer si loo qiimeeyo horumarka hirgalinta. Warbixinta tirada waxa loo sameeyey Kormeerka Guud iyo gudida Dugsiga waxayna loo qorayaa Warbixinta Sanadlaha. Iskuduwayaasha OHW ee DWC, oo keenaysa ururinta macluumaadka iyo qoritaanka Warbixinta Sanadlaha ah. Warbixinta waxa loo gudbiyey Waaxda Waxbarasada Dugsiga Dhexe iyo Sare, waxaana lala wadaagay hogaamiyayaasha dugsi, iyo daneeyayaasha kale iyadoo la maraayo wabsaaydka OHW. Hogaamiyayaashu waxay ka masuul yihiin hubinta u hogaansanaanta Siyaasada ee kormeerka kormeerka guud ee dugsi. Waaxaha degmadu waxay ka masuul yihiin taageerida hirgalinta iyo kormeerka qeybaha gaarka ah.</p>   |